

Baaritaanka Kansarka Naasaha & Makaanka Afkiisa



Bixinta baaritaanka kansarka naasaha iyo makaanka iyo adeegyada ogaanshaha cudurka ee dadka degan deegaanka Washington.

Wax ka baro xulashooyinka helitaanka baaritaanka!

Breast, Cervical and Colon Health Program (Barnaamijka Caafimaadka Naasaha, Makaanka iyo Mindhicirka Dheer) wuxuu dadka u qalma ee deeganka WA degan siiyaa baaritaan kansar oo bilaash ah.

Barnaamijkaan wuxuu u adeegaa dadka:

- Aan haysan caymis caafimaad ama laga jaro lacag badan.
- Dakhligoodu hooseeyo.
- Buuxiyay habraacyada/shuruudaha da'da.

Adeegyada Waxaa ka mid ah:

- Baaritaanka kansarka naasaha (baaritaannada naasaha iyo raajada naasaha).
- Baaritaannada kansarka makaanka (baaritaannada Pap iyo HPV).
- Baaritaano debagal ah hadba sida looga baahdo, iyadoo lagu salynayo natiijooyinka baaritaanka.
- Kaalmada dhexmeerida agabyada daaweynta haddii loo baahdo.

Baaritaanka kansarka wuxuu badbaadiyaa nola!

- Hadba intaad sii weynaanayso, waxaad **halis sare** u sii galaysaa inaad kansar qaado.
- Haddii kansarka goor hore la ogaado, inta badan way fududahay in la daaweeyo daawayntuna aad ayaa loogu guulaystaa.
- Sida ugu fiican ee kansarka xili hore loogu ogaan karo waa in la sameeyo baaritaan joogto **ah, badanaa ma jiraan calaamado digniin ah.**

Haddii aadan u qalmin caymiska Washington Apple Health oo aadan caymis lahayn, waxa laga yaabaa inaad weli u qalanto baaritaannada kansarka ee bilaashka ah.

Wac Breast, Cervical and Colon Health Program

Wac 1-800-756-5437 si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan barnaamijka deegaankaaga iyo haddii aad a qalanto.

Wac WA Dept. of Health (Waaxda Caafimaadka ee WA) si aad u ogaato xog badan oo ku saabsan Washington State Program (Barnaamijka Gobalka Washington) adigoo ka wacaya 1-888-438-2247

Pub. # 349-045 January 2021



Ma Qabtaa Su'aalo Ku Saabsan Caymiska CaCaafimaadka?

Booqo: wahealthplanfinder.org

Wac: 1-855-923-4633

TTY/TDD: 1-855-627-9604

Caawimaada waxaa lagu heli karaa 175 luuqadood oo kala duwan

To request this document in another format, call 1-800-525-0127. Deaf or hard of hearing customers, please call 711 (Washington Relay) or email civil.rights@doh.wa.gov.